



King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

MAALGELINTA BAY, 'ADEENA

Miisaaniyad sanadkeedka 2023-2024 waxa ay gelinaysaa ilaalinta waxyaabaha aan ku jecelnahay gobolkeena iyo soo celinta wixii lumay:

Qaadida talaabo degdeg ah si wax looga qabto isbadelka cimilada

- **U badelida gaadiidka baska Metro gaadiid aan qiiq lahayn:** \$180 milyan oo loogu talagalay in lagu gado basaska baytariga korontada ah leh iyo \$43 milyan oo loogu talagalay kaabayaasha aan qiiqa lahayn si loo hubiyo in 1,400 ee gaadiidka Metro aysan lahayn wax qiiq ah sanadka 2035.
- **Koronto ka dhigida maraakiibta King County:** \$26.7 milyan oo lagu maalgelinaayo kaabayaasha dhaqaalahi si loo soo saaro 50 boqolkiiuba maraakiibta nalka ee King County marka la gaaro 2025.
- **Abuurista Xafis Cimilo ee cusub:** \$2.3 milyan oo loogu talagalay sidii kor loogu qaadi lahaa dadaalka, isku dubaridka, iyo kartida uu ku bixinayo waxqabadka cimilada gudaha iyo iskaashiga magaaloooyinka iyo iskaashiga gobolka.
- **Iskaashi la sameyn ta bulshada:** \$460,000 oo loogu talagalay Climate Equity Task Force (Kooxda qaabilisan Sinaanta Cimilada) si ay u taageeraan jawaabaha ay bulshadu hogaaminayso ee la xariira cadaalada cimilada.

Kor u qaadista tayada biyaha iyo deegaanka

- **Dib u soo celinta deegaan kaluun:** \$28.5 milyan oo lagu maalgelinaayo ilaha si meesha looga saaro caqabadaha la xariira kuluunka deegaanka. King County waxay soo celin doontaa helitaanka boqolkiiuba 50 ee kuluunka laga soo saaro deegaanka marka la gaaro sanadka 2032.
- **Dib u soo celinta caafimaadka Puget Sound:** \$23.2 milyan oo loogu talagalay sidii looga saari lahaa nafaqooyinka sida nitrogen iyo "kiimikada rasmiga vah" biyaha wasakhda ah.
- **Balaarinta dib soo celinta kaymaha:** \$1.7 milyan oo loogu talagalay sidii loo balaarin lahaa dib soo celinta kaymaha ee ay degmadu leedahay oo loo hirgeliyo xeeladaha dhimista dabka.

Ilaalinta dhulka bannaan ee kuyaala meelaha banaanka, madadaalada, kaymaha, iyo isticmaalka beeraha

- **Kordhinta maalgaashiga isbadelka dhulka:** \$60 milyan oo loogu talagalay sidii loo ilaalin lahaa ku dhawaad 1,500 akres oo kamid ah dhulka dabiiciga ah ee mudnaanta sare leh ee soo hadhay oo qayb wayn ka ah Land Conservation Initiative (Hindisaha dhowritaanka Dhulka).

Maalgelinta Bulshooyinka Mudnaanta Leh

- **Kordhinta helitaanka agabka kulaylka iyo baalayaasha cadceeda:** \$1 milyan oo loogu talagalay sidii loo balaarin lahaa barnaamijka tijaabada Energize (tamareynta), kaas oo ku rakibaya matooroda kulaylka waxtarka sare leh guryaha ay degan yihiin dadka degan deegaanka ee dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dakhliga dhexdhexaadka ah hela ee White Center iyo Skyway, si loogu daro baalasha cadceeedda. Sidoo kale degmadu waxay maalgelin doontaa \$1.9 milyan si ay u siiso deyn bixiyaasha deegaanka dabacsanaan dheeraad ah si ay u bixiyaan ikhtiyaaro maalgalin oo ka wanaagsan kuwa leh khatarta sare ee guryaha hagaajinta ee sidoo kale hagaajiya deegaanka. Barnaamij la mid ah oo kajira Snohomish County ayaa maalgeley lacag dhan ilaa \$600,000 wuxuuna horseeday in ka badan \$23 milyan amaahda dhimista isticmaalka tamarta guriga muddo 13 sano gudahood ah.
- **Abuurista istaraatijiyyada yareynta kulaylka sa'a'idka ah:** \$350,000 oo loogu talagalay sidii loogu xiri lahaa la-hawlgalayaasha maaraynta xaaladaha degdegga ah ee gobolka si loo hormariyo istaraatijiyyada yareynta kulaylka sa'a'idka ah.
- **Taageerida beeralayda soogalootiga iyo qaxootiga ah:** \$130,000 oo loogu talagalay sidii loo sii wadi lahaa taageerada beeralayda soogalootiga iyo qaxootiga ah iyadoo loo marayo Farmland Leasing Program (Barnaamijka Amaahda Beeraha).

Su'aalo ma qabtaa? La xariir kcexec@kingcounty.gov.